## Wareysiga dabadiis side baan ilmahayga u caawin karaa?

Ilmahaaga u mahadnaq in uu wariyaha la hadlay oo dhagayso haddii ay doortaan in ay ka hadlaan waraysigii. Waxa muhiim ah in aanad ku khasbin ilmaha in uuka hadlo waraysigii.

*U sheeg in aad jeceshahay oo aad garbtaagan tahay adiga oo aan eegeyn wixii ay waraysiga arkii ay joogeen sheegeen, wuxuu doonaba ha*

Ilmahaaga u sheeg hadii iyaga wax ku dhaceen in aanay iyagu dambi ku lahayn, ay jiraanna dad caawin doona.

## Udoodista iyo ilaha Caafimaadka:

Harborview Abuse & Trauma Center (HATC)

Xarunta Harverview ee La xidhiidha Murugada iyo Dhibaatooyinka Kufsashada

www.uwhatc.org

King County Sexual Assault Resource Center (KCSARC)

Xarunta Degmada King ee Shaqaleh Dhibaatooyinka Kufsashada

www.kcsarc.org

## Directions to Interview:

Interviews are held at several locations in King County. Your detective will let you know where to go for your child's interview.

**KCSARC**

707 S Grady Way Suite 300

Renton, WA 98057

**King County Courthouse**

516 Third Avenue - 4th floor, Ellie's Place

Seattle, WA 98104

**Children and Family Justice Center**

1211 East Alder Street, 4th floor

Seattle, WA 98122

la so salaamo

CJCKC.org

Somali Edition: Updated March 2020

Ellie's Place

Serving Survivors and Seeking Justice

# Xarunta Cadaalada Cayruurtaa Eenter ee Degmada King

Children's Justice Center *of* King County

## Waxa laga Filayo Waraysiga Ilmaha

**What to Expect from a Child Interview**

NATIONAL CHILDREN'S ALLIANCE®

ACCREDITED MEMBER

## Ilmahayga ayaa la hadli doona?

Ilmahaaga waxa la hadli doona qof aqoon u leh wareysiga ilmaha. Wareystuhu waxa uu siiba tababar u leeyahay qaab wareysi oo ilmaha u ogolaanaysa in ay ka hadlaan waxa dhacay, marka ay jiraan arrimo warwar leh oo la tuhunsanyahay in dhibi dhacay. Wareysigu waa mid aan ilmaha ka bajinayn dhan kasta marka laga eego, haday noqoto aragtida qolka waraysiga iyo qaabk ilmaha loo waraysanayo iyo awooda waraystuhu uu galinayo. Ilmahaaga khasab hadal lagagama keenayo waxaana loo ogol yahay in uu bririf (fasax) qaato ama warysiga joojiyo marka uu doono.

## Hadma ayaan ilmahayga u sheegaa wareysiga?

Adiga ah waalidka ama cida ilmaha ka mas'uulka ah adiga ayaana garan kara marka ugu fiican ee ilmahaaga aad u sheegaysid in ay meel lagu wareysto tagi doonaan. Guud ahaan, in ilmaha aad u sheegti wareysiga maalin ka hor – ama xataa marka aad ku sii socotaan wareysiga – waxa ay ilama siinaysaa mudo ku filan si aanu wareysigu u noqonin kadiso ilmahana ugu abuurin walbahaar badan. U doode ayaa idii jooga si aad uu kuula hado wareysiga horeteed oo uu uga jawaabo wixii su'aalo ah ama aad ka warwarsantahay.

## Wareysiga horeteed sidee baan ilmahayga u caawin karaa?

Ilmahaaga ogaysi in carruur kale timaado si ay ula hadlaan wareystaha ay tahayna shaqada wareystaha in uu dhagasto carruurta. Imahaaga u ogolow in uu wareysaha kala hadlo waxa laga yaabo in ay iyaga ku dhaceen. Ugu balan qaad in aad joogidoontid meel u dhow una imanaysid hadday kuu baahdaan. U sheeg in aanay iyagu dhibato sameyn, xasuusina qiima ay leedahay in runta la sheego.

*"Waxa aan kuu gaxaynaya in aad aragtid qof ilmaha la hadla. Ilmaha waxa ay kala hadlaan wax kasta oo lagayaabo in dhacay. Adigu dhib maad gelin. Waxa fiican in aad u sheegtid wax kasta oo dhacay. Waxa had iyo jeer muhiim ah run sheegtid."*

## Ilmahaygu waraysiga cuno iyo wax lagu ciyaaro ma soo qaadan karaa?

Carruurta intooda badani malaha feejignaan badan. ciyaarta iyo cuntaduna waxa ay ka jeedin kartaa wareysiga. Xasuusi ilmahaaga ujeedada kulanku in uu yahay in lala hadlo (aan la ciyaarin) waraystaha. Waxa talo wanaagsan ah in ilmahaaga cunto la soo siiso waraysiga ka hor.

## Wareysiga ma daawan karaa?

May. Dadka wareysiga daawadaa wa dambibaadhaha iyo marmar kalkaaliyaha arrima bulsada (social worker). Rugta wareysigu waa in ay ahaato meel ilmuhu si madax banaani ah uu ugu hadli karo. Daawashada wareysiga ilmahu waxa ay saamayn kartaa marag furka waalidka ama/iyo cida ilmaha ka mas'uulka ah. *Takaale yo/ama cida kale ee ilmaha ka mas'uulka ahi badanaa waa marag marka ay dhici karto in arrintu maxkamad gasho, hadlkii aad markaa wa odhan waxa waxyeeleen kar*. Wareysiga cajalad ayaa lagu doobayaa.

## Muddo intee leeg ayuu wareysigu qaadan doonaa?

Mudada waraysigu waxa ay ku xidhan tahay ilmahaaga – sida ay wax feejignaadaan, sida ay u hadlaan, iyo sheekadoodu inta ay leeg tahay. Waraysigu badanaa waxa ay qaatan ilaa dhamadaa ***30 - 45 miridh.*** Waraysiga dabadii dambibaadhaha ayaa kuu sheegi doonaa guud ahaan wixii la ogaaday oo kaagana jawaabi doona su'aalahaaga ku saabsan baadhitaanka.